



Xulashada qorshe koronto oo wanaagsan

Hubi in aadan lacag xad dhaaf ku bixinayn korontadaada

Shirkadaha iibya korontada waxay leeyihii qorshayaal badan oo kala duwan, mid walbana wuxuu leeyahay qimma kala duwan si ay u siiyaan koronto gurigaaga. Waxaa kuu baaqan karta boqollaal doolar sannad kasta haddii aad u badelatid qorshe koronto oo ka jaban.

Qiimaha ugu Fiican (Best Offer)

Haddii aadan lahayn internet si aad u isticmaashid shabakada Isbarbardhigga Korontada ee Victoria (Victorian Energy Compare), waxaad wici kartaa shirkada kaa iibisa korontada oo ka codso in lagugu daro 'qiimaha ugu fiican (The Best Offer)'. 'Qiimaha ugu Fiican' waa qorshaha korontada ugu jaban ee shirkada aad hada la joogtid ee korontada kaa iibisa ay u heli karaan qoyskaaga.

Sharchiyada Victoria waxay dhigayaan in shirkadaha korontada ay ku qasban yihiin inay kuugu cadeeyaan biilkaaga haddii ay lacag kuugu baaqan karto qorshe ka jaban midkaaga. Shirkada kaa iibisa 'Qiimahooda ugu Fiican (Best Offer)' ayaa lagu soo bandhigi doonaa bogga hore ee biilka korontada 3-dii billoodba mar, raadi sanduuq (box) ay ku qoran tahay 'lacag ma kuugu baaqan kartaa qorshe kale (could you save money on another plan)?'.

Dalab-bixinta Victoria (Victorian Default Offer)

Dalab-bixinta Victoria (The Victorian Default Offer) waa qiimo koronto oo fudud isla markaasna cadaalad ah oo ay dejisay dawlada Victoria kaas oo ah sanadle, maaha mid ay dajiyeen shirkadaha korontada bixiya. Dalab-bixinta Victoria waxay siisaa Qoysaska Victoria iyo milkiilyaasha ganacsiyada yaryar qiimo koronto oo cadaalad ah haddii aysan awoodin ama aysan dooneyn inay helaan qorshe koronto wanaagsan.

Xaashiyaha xaqiiqada ee korontada Victoria

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qorshaha korontada, ha ahaado qorshahaaga hadda ama mid aad ku fikirayso inaad u beddelatid, waxaad waydiisan kartaa shirkadaha korontada iibya inay boostada kuugu soo diraan xaashida xaqiiqda ee qorshaha korontada. Xaashidan xaqiiqda waxaad ka heli doontaa macluumaad si sahan lagu fahmi karo oo ku saabsan qorshaha korontada, sida kharashka, haddii ay jirto lacag dhimis macmiilka loo sameynayo waqtiga loo qabtay haddii uu ku bixiyo lacagta, iyo inta uu qandaraaska soconayo.

Sida aad uga codsan karto shirkada kaa iibisa korontada inay kuugu bedelaan 'Qiimaha ugu Fiican'

Intaadan wicin ka hor:

Hubi inaad haysatid:

- Biil koronto ama gaas oo dhawaanahan ah

Ma u baahan tahay turjubaan?

Biilasha korontadaada waxaa ku jiri doona macluumaad ku saabsan adeega turjubaanka lacag la'aanta ah.



Markaad wacdid:

Usheeg shirkada kaa iibisa korontadaada:

"Biilkaygu wuxuu sheegayaa inay lacag iigu baaqan karto qorshe kale oo koronto ah. Fadlan ma igu dari kartaa qiimahan ugu fiican!"

Shirkada kaa iibisa korontada ayaa u beddeli doonta qorshahaaga 'qiimaha ugu fiican (Best Offer)' inta aad taleefanka ku jirtid. Kadib waxaad bilaabi doontaa inaad ku bixiso qiimo jaban korontada aad gurigaaga ku heshid.